




Tixgelin ayaa mudan tahay!

Haddii aad go'aan adag ka qaadato daroogada cannabis wuxuu saamayn ku yeelanayaa da'yarkaaga.



Stockholms stad

stockholm.se/nejtillcannabis



Aragtidaada mudnaan koowaad ayee leedahay!


Maadaama aad leedahay da'yar ayaa qoraal-warbixineedkaan lagu soo diray. Adigu iyo ubadkaaga ba waxaad ku sugan tihiiin xilli is-bedel leh. Waalidka da'yarka waxyaallo badan ayuu ka feker. Waxaa laga yaaba inaad marna ka fekerin in ubadkaaga u bartay maandooriyeyaasha loo yaqaanno xashiish ama marijuana, kuwaasoo magaca wadajirka ee loo yaqaanno yahay cannabis.

Tirada dhallinyarada ku nool magaalada Stockholm oo isticmaalay daroogada cannabis, tirokoob ahaan way ka saraysaa kuwa ku nool dalka intiisa kale. Lama oran karo dhallinyarada oo idil way tijaabiyeen daroogada cannabis. Dhallinyarada badidooda ku nool magaalada Stockholm weligood ma tijaabin. Sababta ugu muhimsan oo ay dhallinyarada

ku tijaabin daroogada cannabis, waxay tahay waalidiintooda darteed. Maxaay-eelay, waalidiinta kama filanayaan in da'yarkooda uu daroogada cannabis tijaabiya. Tixgelin ayaa mudan tahay!

Wada-hadal da'yarkaaga la yeelo!

Wada-hadal la yeelanshada ku salaysan amuuraha daroogada cannabis ama



Dhallinyarada badidooda dhigata sannad-dugsiyeedka 9'aad ku nool magaalada Stockholms ma tijaabin maandooriye. Kuwa tijaabiya waxay badidooda tijaabiyeen nooca daroogada cannabis. (Waxaa la siiyay fursad ay ku calamadeeyaan dhowr jawaab kala duwan oo xiriir la leh nooca maandooriyeha). Laga soo xigsaday: Cilmi-baaristii la magac baxday **Stockholmsenkäten 2012**

Qof doonaayo in hooyo iyo aabe ku abuurto niyadjab ma jiro.

Dhahida waxaa laga soo xigsaday da'yar ka tirsan kooxda xoog-saarka.

darooyinka kale ma aha arrin sahlan. Waalidku hab fuduud ubadkiisa uguma qeexin karo daroogada, siiba haddii ubadkiisa u aqoon heer ah u leeyahay. Badi ahaan waxaa suurtagal noqon karto in da'yarku ka dhego adeego waannada waalidkiisa. Waxaa dhici karto in uu ku muujiyo in usan dan ka lahayn ammuuraha muhimka ah ee aad doonayo inaad kala hadasho. Haseyeeshe, xaqiiqdu waxay tahay in dhallinyarada badidooda ay doonayaan in waalidiintooda kala sheekaystaan ammuuraha xiriirka la leh daroogada cannabis. Xasuuso in dhallinyarada ay fiiro-gaar siiyaan hadalada waalidka, inkastoo la moodo in aysan dhego u dhigayn. Sidaas awgeed, xiriirka aad da'yarkaaga la leedahay iyo hab-dhaqankaaga cad waxay leeyihiin muhimad wayn!

Aqoon-korso

Dowladda hoose ee magaalada Stockholm waxay soo diyaarisay bogga olo-olaynta, halkaas ayaa ka heli kartaa isku-xireha bogagga warbixin dheeraad ku saabsan daroogada cannabis. Aqoon-korsasha waa gogolxaar wanaagsan. Taasoo ku sahlun doonto dood la yeelashada da'yarkaaga. Isagu wuxuu ka soo xigsadaa saaxiibadiisa, filimada, muusikada ama shabakadda internetka.

Hadaladii uu wakiil-hay'adeedka adeegga bulshada soo jeediyay

Waalid ahaan waxaad tahay qofka noolasha da'yarkaaga ugu muhimsan! Aragtida dheer ee Dowladda hoose ee magaalada Stockholm waxay tahay in fursado wanaagsan la siiyo dhammaan carruurta iyo dhallinyarada. Dowladda hoose waxay waalidiinta siin kartaa talo iyo taageero kala duwan ku wajihan gudashada waalidnimada, ku saabsan tusaale ahaan ammuuraha daroogada cannabis. Waxaan rajeynayaa in qoraal-warbixineedkaan u waxtar ku noqdo!



Anna König Jerlmyr
Wakiil-hay'adeedka adeegga bulshada

Xaqiiqda daroogada cannabis

Cannabis waa magaca koox dhir loo yaqaanno (Cannabaceae), sida xashiish, marijuana iyo saliida xashiisha laga sameeyay.

Dhirta waxaa ku jira maadada THC keenta markaamida. Falxummada muddada dheer ee daroogada cannabis waxay siyaabo kala duwan saamayn ku yeelata jirka – siiba maskaxda.

Midabka daroogada Marijuana waa cagaar, wuxuu leeyahay muqaalka caws qallalan oo la soo shiiday. Xashiishka waxaa loo iibiyaa isago gabal-gabal yaryar ah, midibkiisa-na waa inta u dhaxaysa buni qafiif iyo maddow. Labada nooc ba badi ahaan waa la cabba, iyadoo sigaar ahaan loo duuduubay ama beeb. Qiiqiisa wuxuu leeyahay ur macaan.

Qofka cabbay daroogada cannabis wuxuu noqon karaa qof degan oo hadal iyo qosol badan ama sida qof hurdo hayso oo ammusan. Wuxuu kaloo muujin karaa qoomamayn, rabitaan-xummo, dareen-cabsi iyo in uu daba-joog dareemmo. Garaaca halbowlaha oo kor u kaca, af-qalalan, indha-gaduud iyo baahi dheeraad waa calaamado kale lagu garto, laakinse way adag tahay garashada qofka maandoorsan.

Daroogada cannabis waa ka mamnuuc dalka Iswiidan, gedideeda, iibsashadeeda, haysashadeeda iyo isticmaalkeeda ba.

Laga soo xigsaday: drugsmart.com (CAN, Centralförbundet för alkohol- och narkotikaupplysning) cannabishjalpen.se

stockholm.se/nejtillcannabis

På kampanjsidan finns länkar till mer information om cannabis. Här hittar du också kontaktuppgifter till din stadsdelsförvaltning.

على الصفحة الإلكترونية للحملة، يمكنك أن تقرأ هذه المعلومات باللغة العربية

This information can be found in **English** on the campaign website.

На сайте кампании вы можете прочитать эту информацию на **русском** языке.

En la página de la campaña, puedes leer esta información en **español**.

Bogga olo-olaynta waxaad ka akhrisan kartaa warbixintaan oo **af-soomaali** ku qoran.

አብቲ ናይ ጎሰጎስ ገጽ፡ ነዚ ኣበሬታዚ ብትግርኛ ምንባብ ይከኣልዎ።

Xiriir

Haddii aad arrin is-waydiinayso ama aad wal-walsan tahay, waxaad la xiriiri kartaa Maamulka adeegga bulshada ka hawlgala degmada aad degan tahay. Warbixin ku saabsan sida loola xiriiro waxaad ka heleysaa shabakadda internetka stockholm.se/kontaktunga

Waxaad kaloo la xiriiri kartaa Maria Ungdom.
08-508 43 710 (maalinimmo)
08-123 47 410 (degdeg)

stockholm.se/nejtillcannabis



Stockholms
stad